Sida Dacwadda Waxbarashada Qaaska Qabyta C Loo Xareynayo Dhexgalka Hore ee Dhallaanka & Socod-baradka, Da'aadaha Dhalashada-2 Sano

Dukumiintigaan wuxuu sharaxasaa sida dacwadda looga xaraysanayo Waxda Waxbarashada Minnesota (MDE) taaso ay dhici karto inay jiraan sharci ama qawaaniin jabin waxbarashada khaaska la xariira. Nidaamka cdacwadda waa lacag-la'aan waxuuna noqon karaa hab duwan ee sharciga loo marayo. Ujeddada dukumiintigaan waxay tahay in laga helo cawimaad, macluumaad guud ee dadka la siinayo. Ma galayso booska talada sharciga mana baddalayso latashiga qareen shati haysta lala galayo. Macluumaadka hoose layskuma hallayn karo sida wax dhammaystiran ama jawaab buuxda u noqonaya xaaladdaada sharciga la xariirta. Dokumiintigaan kuma ay jiraan macluumaad buuxa ee sharciga gobolka iyo kan federaalka lagu dabbaqayo.

TALLAABOOYINKA LA QAADAYO KAHOR INTA AAN DACWADDALA XARAYSAN

Kahor inta aan cabashada la xaraysan, MDE waxay waalidka ama dadka ku dhiirrigalinaysaa in ay marka hore dugsiga degmada maamulihiisa waxbarshada qaaska la xariiraan, kaaso ku caawin kara sida arrinka wax looga qabanayo. Eeg Maamulaha Taxanihiiisa ee Waxbarashada Qaaska. (education.state.mn.us > Dooro Welcome to MDE > Contact Information - Schools and Organizations > Special Education Directors List).

YAA XARAYSAN KARA CABASHADA WAXBARASHADA QAASKA?

Cid waliba, uu urur ku jirto, waxay cabashada waxbarashada qaaska ka xaraysan kartaa MDE.

MAXAY TAHAY SABABTA CABASHADA LOO XARAYNAYO?

Cabashda waxaa laga xaraysan karaa cid waliba ee si toosa u bixisa adeegyada waxbarashada caruurta u siisa oo kharashka ay bixiyaan dadka canshuurta laga qaado, taas oo ay dhici karto in ay jabisay sharciga ama xeerka waxbarashada federaalka muddo saddex sano gudahood laga joogo taariikhda cabashada ay MDE qabatay. Haddii aadan hubin in dareenka aad qabto uusan ahayn mid ku habboon, waxa aad la soo xariiri ururka wax u doodda ama MDE si caawimaad lagu go'aaminayo haddii qorashada cabashada ay ku habboontahay. Helitaanka taxanaha hayadaha wax u dooda waxaa laga helayaa shabakadda Xarunta Baahinta Qaranka ee Caruurta Naafonimada Qaba (National Dissemination Center for Children with Disabilities).

WAA MAXAY NOOCYADA WALAACYADA AY WAALIDKA KA SHEEGEEN WAXA KU SAABSAAN WAXBARASHADA QAASKA EE CARUURTOODA EE NIDAAMKA DACWADDA LOO MARAYO?

Nidaamka dacwadda waxbarashada qaaska waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in caruurta oo idil ee naafonimada qaba la siiyo waxbarsho guud ee ku habboon oo lacag-la'aan ah. Kuwa soo socda waa tusaalooyin noocyada arrimaha ay MDE ay waxa uga qabatay ayaadoo nidaadka dacwadda u martay:

- Dugsiga degmada ma yahay mid bixinayay waxbarashada qaaska ee canaug naafonimada qaba uu u baahnaa?
- Dugsiga degmada waxbarashada canugga ma ku bixiyay jawi caadi ah?
- Dugsiga degmada ma uu ku guuldarraystay in uu canugga u aqoonsanwaayo mid naafonimo qaba?
- Canugga ma la siiyay adeegyda sandka oo idil soconaya?

SIDA DACWADDA LOO XARAYNAYO

Waxa aad soo dirtaa bayaan qoraal ah oo saxiixan oo ay ku jiraan dhacdooyin qaas ah oo dacwadda ku taageeraya in hay'ad waxbarasho ay jabisay shuruuda gobolka ama federaalka ee sharciyada ama xeerarka waxbarshada qaaska ayadoo la socoto qaraska lagu xallinayo sharci jabinta lagu eedeeyay. Bayaankaaga qoraalka waxa aad soo raacisaa: cinwaankaaga iyo lambarka telefoonka, magaca iyo cinwaanka canugga, iyo magaca iyo cinwaanka dugsiga uu canugga dhigto. Waxaad kaloo soo raacisaa nuqulka dacwadda aad dugsiga ka qabto.

MEESHA DACWADDA QORAN, SAXIIXAN LOO DIRAYO

Dacwadda qoran fakis ugu dir (651.582.8725), boostada, gacantaada ugu gee: Due Process Supervisor, Minnesota Department of Education, Division of Compliance and Assistance, 1500 Highway 36 West, Roseville, MN 55113-4266.

MAXAY MDE KA QABANAYSAA MARKA AY DACWADDA QABATO?

- Marka ay MDE dacwadda qoran qabato, waxay u xilsaaraysaa baare cabasho kaaso dib u eegaya cabasahda qoraalka ah si lagu ogaado waxa ay yihiin arrimaha la baarayo.
- Baaraha dacwadda wuxuu la soo xariiri doonaa qofka warqadda soo diray si uu ku ogaysiyo in ay dacwaddac sooo gaartay iyo uu kala haddlo waxa laysku haysto, waxa dhabta ah, ama arrimaha iyo dacwadda wax laga baddalo kaddib marka uu wadahadalkaan dhacay.
- Baaraha dacwadda wuxuu warqad arrimaha ka hadlaysa u dirii doona hay'adda guud oo ay tafaasiil ku saabsan warqaddii koobaad ee dacwadda qoraalka ah iyo wixii macluumaad ama eedaymo ah ee ka soo baxay wadahadallada laga yeeshay dacwadda.
- Baaraha dacwadda wuxuu la xariir doonaa maamulaha waxbarashada qaaska si u ku ogaado haddii waxa laysku haysto si aan rasmi ahayn lagu dhammeen karo.
- Baaraha dacwadda wuxuu fursad ka raadin doona in hay'adda guud soo jeediso xal dacwadda wax looga qabanayo iyo fursad ay waalidka dacwadda soo gudbiyay uu isaga oo raalli ka ah uu ku oggolaado wadahadallo dhexdhexaadin hay'adda guud lala galayo.
- Inta baaritaanka lagu jiro, baaraha dacwadda waxyaabaha uu samayn doono waxaa ka mid ah in uu:
    1. La xariiro shaqaalaha ka socda hay'adda waxbarashada si uu ku helo macluumaad dheeraada ama caawimaad qilaafka lagu xallinayo.
    2. Warqad uu diro qofka dacwadda xareeyay, asago taxaya arrimaha ay MDE baari doonto.

3. Ku ogaado haddii baaritaanka uu baahanyahay dad telefon lagula xariirayo, dukumiintiyo qoraal ah lagu codsanayo, meesha laftigeeda la tago, waraysiyo la sameeyo, wadatashiyo lala sameeyo qubarada waxbarashada ama siyaabooyin kale loo maro si si guul leh dacwadda lagu xalliyo.

- Baaraha dacwadda waxa uu dib u eegi doonaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah iyo ku gaaro go'an madax bannaan haddii ay hay'adda waxbarashad ay sharciyada ama xeeraaka gobolka ama federaalka jabisay.

ILAA INTEE LA EGTAHAY MUDDADA AY MDE KU QAADANAYSO XALLINTA DACWADDA?

MDE waxa ay haysataa 60 cisho oo ay dacwadda ku xallinayso. Waqtigaan waxay bilaabmayaa maalinka ay MDE hesho warqadda qoraalka dacwadda. Marka ay jiraan xaalado aan caadi ahayn, MDE waxa dhici karta in ay waqtigaa 60ka cisho kordhiso. Waqtiga 60ka cisho waxa kaloo la sii kordhinayaa marka qolyaha is-haysta ay qiyaarkood ku heshiiyaan dhexdhexaadin ama siyaaboyin kale ee qilaafka lagu xallinayo.

SIDEEN KU HELI KARAA NATIIJOOYINKA BAARIITAANKA?

MDE ayaa go'aanka kama dambaysta qoraysaa iyo nuqulka ay u diraysaa qofka dacwadda xareeyay iyo hay'adda waxbarashada. Go'aanka kama dambaysta wa hirgalayaa iyo waana in la adeecayaa marka uu soo baxo.

MAXAA DHACAYA HADDII MDE AY CADDAYSO IN UUSAN XADGUDUB DHICIN?

Haddii MDE ay caddayso in uusan xadgudub jirin kaddib marka baaritaan ay samayso, galka dacwadda waa la xirayaa marka qoraal kama dambays ah la soo saaro.

MAXAA DHACAYA HADDII AY MDE CADDAYSO IN AY JIRAAN XADGUDBYO SHARCIGA AH?

Haddii hay'adda waxbarashada ay samaysay xadgudubyo u baahan tallaabooyin saxitaanka sharciga, MDE waxay qaadaysaa qorshe leh tallaabooyin saxitaan kuwaaso go'aanka kama dambaysta lagu soo qorayo. Tallaabooyina saxitaanka waxay darsayaan dhibaato kasta ee canugga soo gaartay ayadoo la siinayo barnaamijyo dheeraada ama magdhow waxbarasho. Tallaabooyinka saxitaanka waxay kaloo darsayaan waxkasta oo ay degmadu ka leexataya, tusaale waxaa noqon kara tababaridda shaqaalaha. Hay'adda waxbarashada ee uu xilka saaranayahay waa in ay buuxiso tallaaboyinka saxitaanka ee waqtiga cayiman lagu heshiyay. MDE waxay dabagal ku samaynaysaa hay'adda waxbarashada iyo qofka warqadda dacwadda xareeyay si ay ku hubiso in tallaabooyinka saxitaanka ah la dhammaystiray. Haddii ay hay'adda waxbarashada ku guuldarraysato in dhammaystirto tallabada saxitaanka, MDE waxay qaadaysaa tallaabooyin lagu xaqiijinayo si arrinka lagu xalliyo.

MAXAA LAGA QABAN KARAA HADDII LABADA DHINACBA AYSAN KU QANACSANAYN MDE NATIIJOOYINKEEDA BAARITAANKA?

Waalidka ay dhibaato ka soo gaartay waxa dhacay ama dugisga ay dhibaato ka soo gaartay waxa dhacay waxa ay racfaan ka xaraysan karaan Maxkamadda Racfaanka Minnesota muddo 60 cisho gudahood kaddib marka ay go'aanka kama dambaysta helaan.

DACWADDA MA SII JIRAYSAA HADDII AAN DHEXDHEXAADIN OGGOLAADO?

Haa. MDE waa in ay sii waddo baaritaanka dacwadda waa haddii adiga iyo hay'addada waxbarashada, labadiinuba, aad oggolaataan kordhinta waqtiga kama damabaysta ee dacwadda loo qabtay si aad markaasi uga qaybqaadataan dhexdhexaadinta.

SIDEEN KU HELI KARAA MACLUUMAAD DHEERAADA?

Wixii macluumaad dheeraada la xariira, waxa aad MDE ka wici kartaa 651-582-8689 ama waxa aad gashaa bogga Shabakadda Internetka Waaxda Waxbarshada Minnesota, Laanta Adeecidda iyo Kormeerka (Minnesota Department of Education, Division of Compliance and Assistance): education.state.mn.us > Dooro School Support > Compliance and Assistance.

XAGGEE KA HELI KARA FOOMKA DACWADDA?

Bogga Shabakadda Internetka Waaxda Waxbarshada Minnesota, Laanta Adeecidda iyo Kormeerka (Minnesota Department of Education, Division of Compliance and Assistance): education.state.mn.us > Dooro School Support > Compliance and Assistance > Due Process Forms.